



Helsinki 22.9.2016

WARGELIN KU SOCOTA
KUNDMEDDELANDE
CUSTOMER BULLETIN

MAAHANMUUTTOVIRASTO

MIGRATIONSVERKET

FINNISH IMMIGRATION SERVICE

MAGAN-GALYO CODSADOOW: WAXAA LAGUUGU YEERI DOONAA WARAYSIGII BISHA TOBNAAD INTA AYSAN DHAMMAAN

Dad badan oo bilowgii dayrta 2015 Finland yiimid oo magan-galyo codsadayaal ah ayaa waxay ku khasbanaadeen inay wakhti dheer sugaan in waraysiga laga qaado. Haddaba waxaan hadda kuu sheegaynaa in wakhtigaagi dhow yahay oo muuqdo. Dhammaan sanadkii la soo dhaafay dadkii yimid ee magan-galyada naga codsaday waxaa waraysiga laga qaadi doonaa ugu dambayn dhamaadka bishan tobnaad, marka laga reebo qadiyado gaar ah oo hal-hal ah.

Shaqaalaha kaamka ayaa kuu sheegaya, wakhtiga iyo meesha waraysiga lagaaga qaadayo. Si fiican oo taxadar leh waraysiga isugu diyaari, soona qaado wixii waraaqo ama dokkumentiyoo ah oo aad is lee dahay arintaada falanqaynteeda ayeey saamayn ku yeelan karaan.

Go'aanka waxaad qaadan inta aan sanadkani dhammaan

Waraysiga marka lagaa qaado waxaa khasab kugu ah inaad jawaabta sugto. Haddii aad timid Finland sanadkii 2015 waxaan ku dadaalaynaa inaan codsigaaga go'aan ka gaarno ugu dambayn sanadkan dhamaadkiisa.

Haddii waraysigaagi bilo badan laga joogo oo aadan wali jawaab helin, ha dag-dagin ee wali si dagan noo dhowr oo noo sug. Waa fahmaynaa in wax sugidu ay dhib iyo kadeed tahay. Waxaan u shaqaynaynaa si xoog leh, si qof kastaa go'aankiisa u helo sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah.